

KU SOO DHAWOOW WAXBARASHADA KA HORAYSA DUGSIGA HOOSE!

**WAXBARASHADA KA HORAYSA DUGSIGA
HOOSE WAXAY BILAABAN DOONTAA
ARBACADA, 6 AGOOSTO 2025 WAXAYNA
DHAMMAAN DOONTAA JIMCAHA, 29
MAAJO 2026.**

Salaaman, ardayda mustaqbalka ee waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose!

Waxaad waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose bilaabi doontaan xilliga dayrta. Inta lagu jiro geediga waxbarashada,



Ku soo dhawoow waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose!



Ilmahaagu waxa uu waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose bilaabi doonaa xilliga dayrta. Waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waa hannaan nidaamsan oo hadaf ku wajahan, kaas oo ku salaysan manhaj. Intay socoto waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose, ilmahaagu wuu ciyaari karaa, wax sahmin karaa, noqon karaa mid jir ahaan u firfircoon oo si wadajir ah waxyaabo cusub ula baran karaa carruurta kale. Waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waxay ka kooban tahay

barashada cutubyo leh baaxado kala duwan iyo hababka hirgelinta kuwaas oo tixgelinaya danaha carruurta.

Hawlaha kala duwan waxay carruurta siiyaan khibrado waxayna xoojiyaan dhiiragelinta waxbarashadooda. Ciyaarta iyo khibradaha waxbarasho ee wanaagsan waxay xoojiyaan xirfadaha shucuureed iyo saaxiibtinimada carruurta. Wakhti ayaa loo qoondeeyaa ciyaar maalinle ah oo ku saabsan waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose.

Waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waa waajib. Waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waxa la qabanqaabiyaa maalmaha shaqada ee dugsiga muddo afar saacadood maaintii. Waxbarashadu waa lacag la'aan waxaana ku jira cunto diirran oo maalinle ah. Marka laga soo tago waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose, carruurta waxay ka qaybqaadan karaan waxbarashada carruurnimada hore ee kabka ah, taas oo ku xiran khidmad. Baahida aad u qabto waxbarashada carruurnimada hore ee kabka ah waxaad ku muujin kartaa marka lagu dhiibaangelinayo waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose.

Ikhtiyaarada luqadda ee waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose

Koox kasta oo ka mid ah waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waxay wax bartaan wax ku saabsan luqadaha iyo dhaqamada ay kooxdu matasho. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ikhtiyaarada luqadda ee laga helo waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose: <https://www.vantaa.fi/en/education-and-learning/pre-primary-education/bilingual-pre-primary-education>.

Kaalay wax badan baro oona arag dhismaha!

Munaasabadaha hordhaca ah ee qoysaska ayaa lagu qaban doonaa goobaha waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose bisha Maajo. Waaxda ayaa waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ogeysiin doona munaasabadaha.

**Xasuusnow inaad canugaaga u diiwaangeliso
waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose 7–31
Janaayo 2025!**

Waxaad ilmahaaga uga diwaangelin kartaa si elektaroonig ah adigoo adeegsanaya adeega VaSa ama waxaad arji ku dhaafi kartaa xarunta xannaanada maalinta Waaxyada soo qabanqaabiya waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waxay ku qoran yihiin <https://www.vantaa.fi/en/education-and-learning/pre-primary-education>. Go'aamada waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waxaa lagu dhejin doonaa adeegga VaSa toddobaadka 13aad.